

Nagala soo xidhiidh

Su'aalaha Deg dega ha ama Tabashooyinka Telefoon kalkaaliye Caafimaad
651-229-3890

Su'aalihii kale ee Ku Saabsan Daryeelkaaga
Bukaanada Rugta Caafimaadka St. Paul:
Khad Wicitaanka
Kalkaalisada
651-578-5000

Bukaanada jooga Goobaha Kale:
La xidhiidh xubin ka tirsan kooxda daryeelka caafimaadkaaga Gillette.

Balamaha
651-290-8707

Buggaag, Cajalado Maqal iyo Muuqaal ah iyo Waxyaalo badan

Raadi qalabka ku saabsan naafada, xaaladaha daawooyinka iyo taageerada daryeel-bixiyayaasha.

Qaniimaad Caafimaad iyo Waxbarasho

St. Paul campus, wuxuu u dhaw yahay dabaqa afaraad skyway
651-229-3938
hre@gillettechildrens.com

Sidii aad Guriga isugu Diyaarin Lahayd Calool Faaruqis

Home Bowel Preparation | Somali

Waxbarasho bukaan
DIS040-SO

Maalinta qaliinkaaga ka horaysa, waxaad u imanaysaa Gillette Children's Specialty Healthcare sidaad calooshaada u faaruqin lahayd "bowel prep." Si loogu guulaysto faaruqinta caloosha, waxaa muhiim ah in aad raacdo tilmaamahan intaad gurigaaga jooqto oo ah maalin kahor intaadan isbitaalka iman.

1. Cun cunto uu faybarku ku yaryahay, cunto haraagu ku yaryahay "low-residue diet" (eeg lifaaqa ku saabsan cuntada)
2. Sii Fleet™ enema (raac tilmaamaha ku yaal enema-da) inta u dhexaysa 3 p.m. iyo 4 p.m. Haddaad hadda leedahay barnaamij kale oo aad enema ku isticmaalayso, fad lan sii enemada habeenkaa (xatta haddii ayan ahayn maalintii u qorshaysnayd.)
3. Sii Miralax™ adigoo isticmaalaya tilmaamahan.

3- 6 jir 2 qaado shaah oo lagu qasay 4 ounce oo biyo ah habeen walba muddo 4 habeen ah oo xiriirsan intaadan iman isbitaalka.

6 jir iyo ka kor: 1 qaado shaah oo buuxda oo lagu qasay 4 ounce oo biyo ah habeen walba muddo 4 habeen ah oo xiriirsan intaadan iman isbitaalka.

Tusaale: Imaanshaha isbitaalku waa January 5teeda qaliinkuna waa January 6deeda Sii Miralax January 1deeda ilaa 4teeda.

Miralax waa daawo dhakhtar uu qoro oo aad farmashiyahaaga ka gadan kar to. Miralax waa daawo caloosha jilcisa waxayna caawintaa in ay mindhici rada dhaqaajiso/saxarada ka saarto. Si aad warbixin dheeraad ah u hesho akhri warqadda daawada Miralax la socota ee uu farmashiyuhu ku siin doono; waxyaabaha ay caadi ahaan keeni karto waxaa ka mid ah, dibiro, daaca qurun, calool majiiris, lalabo, iyo shuban.

Subaxda aad calool faaruqiska u imanayso isbitaalka waxaad qaadan kartaa oo kali ah cabitaan wax laga dhax arki karo sida biyo caadi ah ama cabitaan tufaax (apple juice). Mar walba maalintaa waxaa lagu siinayaa cabitaan saafi ah. Hadday suurta gal kuu tahay isku day in aad horay u seexato habeenka aad subaxdiisa isbitaalka imanayso. Mararka qaarkood maalintaa aad isbitaalka u jooqto calool faaruqiska waxay noqon kartaa maalin adag. Nasniin fiican oo aad qaadataa waa ku caawinaysaa.